

Maxaan annagu qabannaa?

Dalal badan ayaa leh Guddoomiyeyaal giddigood leh shaqooyin woxoogaa kala duwan, laakiin dhammaantood waxay u shaqeeyaan inay hubiyaan in carruurta iyo dhallinyaradu ka badbaadaan waxyeellada iyo inay sida ugu suurto badan dadku u ogaadaan xuquuqaha carruurta .

Waa kuwan waxyaabaha u Keith iyo shaqaalihisu u qabtaan carruurta iyo dhallinyarada Wales:

- Inay u wargaliyaan qof kasta, ooy ka midka yihiin carruurta iyo dhallinyarada, arrimaha guddoomiyuhu u qabto iyo xuquuqaha carruurta
- Inay la kulmaan carruurta iyo dhallinyarada oo ay dhageystaan fikradaha ay ka qabaan arrimaha iyaga saameeya
- Inay kala hadlaan carruurta iyo dhallinyarada shaqada guddoomiyaha, waxa kale ee ay tahay in u qabto iyo sidii u qaban lahaa
- Inay eegaan shaqooyinka ururada sida guddiyada iyo ururda caafimaadka inay u fikirayaan xuquuqaha carruurta
- Inay u sheegaan dadka saameynta ku lahaan kara waxa carruurta iyo dhallinyaradu ka fikiraan inay yihiim muhiim iyo arrimaha horay loogu marin lahaa.
- Inay talo iyo macluumaad siiyaan carruurta iyo dadka waaweyn ee la soo xiriira kooxda guddoomiyaha.